# PPS Communicable Disease Response Protocol Comms Fall 2021

**Ujeeddo:** Xiriirka iyo Jawaabaha Waalidiinta ee Xanuunka COVID-19

Waalidiinta iyo Ardayda Qaaliga ah ee PPS,

Waan idinla wadaagnaa welwelkiina ku saabsan faafitaankan sii socda ee xanuunka COVID-19 bulshadeena dhexdeeda iyada oo ay haddaba sidaas tahay waxaa aad nooga go'an inaan ilaalino caafimaadka iyo nabadgelyada ardaydeena, qoysaska iyo shaqaalaheena. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay qeyb libaax ka qaadanayaan iyaga oo qeyb ka ah hay'adaha caafimaadka gobolka iyo degmada sidii looga xakameyn lahaa bulshadeena inaanu ku faafin xanuunka COVID-10. Waxaan si dhab u qaadaneynaa mas'uulliyadayada naga saaran inaan isha ku hayno iyada oo aan la xiriireyno goob kasta oo laga soo sheego qof u jiran xanuunka COVID-19, sidaas darteed anakuna markaa waxaan qabaneynaa qeybtayadii sida loo xakameyno ee ah inaanu faafin fayrisku taasi oo ardayda iyo dadka waaweyn lagu wargalin doono inay dadka kale iska iskaliyeeyaan iyo/ama iskaarintimeeyaan.

Dhammaan goobaha laga helo dad qaba xanuunka COVID-19 iyo kuwa laga war helo inay la sameeyeen xiriir dhow waa la baarin doonaa iyada si **gaara ah** dhacdooyinkan iskaashi lagala sameynayo hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee aan gacan-saarka leenahay. Dhacdooyinka la xiriira COVID-19 ee soo socdaa waxay kaa siin doonaan faham wanaagsan sida dugsiyada degmadu ay uga jawaabayaan dhacdooyinka la xiriira COVID-19 iyo taageerada la siinayo ardayda iyo qoysaska ay saameysay.

**Dhacdadda 1aad: Ardaygeygu wuxuu bilaabay inay ka soo muuqdaan calaamado jiro intii ay iskuulka joogeen.**

Haddii ardaygaagu bilaabo inay ka soo muuqdaan calaamadaha COVID-19 ama uu xanuunsado,

- Shaqaaluhu waxay ardaygaaga ka caawin doonaan inay geeyaan goobta loogu talogalay in la geeyo dadka jiraday ee la yiraa "Goobta Calaamadaha" halkaasi oo kalkaaliyaha caafimaadka iskuulka,kaaliyaha caafimaadka ama shaqaale loo tababaray oo gaar ahi ay ku sameyn doonaan baaritaan dheeraad ah.
- Haddii aanu helno oggolaansho qoraal ah oo degdeg ah waxaan ka qaadi doonaan baaritaanka COVID-19 iyada oo ardaygaagu uu isagu iska qaadi karo baaritaanka sankooda laga qaado, baaritaankaasina waa la dhammeystiri doonaa.
- Shaqaalaha iskuulku wuxuu si degdeg ah u wargalin doonaan qoyska ardayga in ardaygoodu u baahan yahay in laga soo qaado iskuulka iyada oo aanan eegin waxa ay noqotay natiijadii baaritaanku, sababo la xiriira calaamadahani xanuunka ee ka soo muuqday.
- Waxaanu adiga iyo ardaygaaga siin doonaa si degdeg ah natiijadii COVID-19 ee laga qaaday iyo tilmaamaha ardaygaaga ee ah "waqtiga uu ku soo noqonayo iskuulka".
- Haddii aanad saxeexin oggolaanaha baaritaanka degdeg ah ee COVID-19, waan kula soo xiriiri doonaa iyada oo aan ku wargalin doono inaad ilmahaaga ka soo qaadato iskuulka sababtoo ah wuxuu leeyahay calaamadihii jiro.

**Muhiim/Lagama Maarmaan**
Haddii aad rabto in baaritaan COVID-10 lagu sameeyo ardaygaaga haddii ay ka soo muuqdaan calaamao ama uu xanuunsado inta uu ku sugan yahay iskuulka, taasi oo aanad soo buuxin saxeexa foomka, fadlan soo  buuxi ka dibna waxaad u soo gudbisaa iskuulka ardaygaaga:

- Under 15 | Spanish, Vietnamese, Chinese, Russian, Somali
- Over 15 | Spanish, Vietnamese, Chinese, Russian, Somali

**Dhacdadda 2: Ardaygeyga waxaa laga helay xanuunka COVID-19.**

- Haddii aad ka war hesho in ardaygaaga laga helay xanuunka COVID-19, waxaan ku weydiisaneynaa sida ugu degdeg badan inaad u soo wacdo iskuulka si aad u wargaliso natiijada ka soo baxday baaritaanada ka dibna ilmahaaga ha joogo guriga oo yaanu iman iskuulka.
- Shaqaalaha iskuulku waxay raaci doonaan Habraacyada Waxqabaka Cuduradaa Faafa ay kaga go'aan qaataan dadka la filayo inay ku dhawaayeen ee xiriir dhow la sameeyey iyada oo lagu salaynayo macluumaadka laga soo ururiyey habkii dabagalka. Aqoonsiga magacyada ardaydu waxay noqon doonaan kuwa qarsoodi ah oo aan cidina ogaan.
- Iskuulku wuxuu si toos ah kuugu soo diri doonaa telefooon haddii ardaygaagu xiriir dhow la sameeyey qof qaba xanuunka taasi oo ay ku waajibeyso shuruuda ah inuu ku dhawaaday qof jiran. Waxaa lagu weydiisan doonaa inaan kaarintimeyso iyada oo lagu siin doona xaashida wargainta caddeynta inuu xiriir la sameeyo qof qaba xanuunka oo ay la socoto taariikhda uu iskuulka ku soo noqon doono. Xoga dheeraadka ah, gargaarka,iyo agabyo kale ayaad adiga iyo ardaygaagu sidoo kale la idin siin doonaa.
- Dugsiyadu waxay u diri doonaan ogeysiis guud dhammaan shaqaalaha iyo bulshada iskuulka oo ku saabsan in goobta laga helay qof qaba xanuunka.
- Dugsiyadu waxay xaqiijin doonaa inay ardaydu helaan taageero joogta ah oo waxbarsho inta ay ku  jiraan iskaliyeynta/iskaarintimeynta iyo in la soo dhaweyn doono marka ardaydu ku soo noqdaan.

**Dhacdadda 3: Qoyska ardayga ayaa ka war helay in ardaygoodu xiriir la sameeyey qof bulshada ka mid ah oo qaba xanuunka COVID-19.**

- Haddii aad ka war hesho in ardaygaagu xiriir dhow la sameeyey qof qaba xanuunka COVID-19, waxaan ku weydiisaneynaa inaad wacdo iskuulkaaga oo aad wargaliso inuu ardaygaagu la kulmay qof qaba xanuunka iyada oo ilmahaaga aad ku hayneyso guriga.
- Shaqaalaha iskuulku waxay raaci doonaan Habraaca Waxqabadka Cudurada Faafa dhigayo.
- Haddii la xaqiijiyo, ardaygaaga waxaa la weydiisan doonaan inuu iskaarintimeeyey laga soo bilaabo maalintii ugu dambeysay ee uu la kulmay qofka qaba jirada oo ku siman 10 maalmood ama ardayda guri kula nool qof qaba xanuunka.
- Dugsiyadu waxay xaqiijin doonaan inay ardaydu si joogta ah u helaan taageerada waxbarashada inta ay ku jiraan iskaarintimeyntooda oo ku salayan baahiyaha ardayga iyada aan soo dhaweyn doono marka ay iskuulka ku soo noqdaan.

**Dhacdadda 4: Waxaan maqlay suurtagalnimada in qof qaba xanuunka COVID-19 ka mid ahaa fasalka ardaygeyga ama iskuulka.**

- Dugsiyada waxay baaritaan ku sameyn doonaan qof kasta oo loo malaynayo inuu qabo xanuunka iyada oo la wargalin doona dadka la filayo inay ku ag dhawaayeen iyaga oo la siin doon wixii taageerada iyo agabka ay u baahan yihiin, sidoo kale iskaarintimeynta iyo macluumaadka waqtiga ardaygu ku soo noqonayo.

  ***Iyada oo tixgalin la siinayo qarsoodinimada, iskuulkaagu kuma wargalin doono fasalo gaar ah laakiin waxaan idin siin doonaa macluumaad heerka iskuulka ah.***

**Afartan arrimood waxay ka turjumayaan afar dhacdo oo  ka dhici kara iskuuladeena. Wixii macluumaad dheeraad ah ee tilmaamaha ODE fadlan waxaad ka fiirisaa** Qorsheynta COVID-19 ee Dhacdooyinka Iskuulada. Agabkani waxaa diyaariyey Waaxda Waxbarashada Oregon(ODE) iyo Hay'ada Caafimaad Oregon(OHA) oo ay la socdaan biiro dheeraad ah oo ka

timida hay'adaha caafimaadka dadweynaha maxaliga ah(LPHA), kalkaaliyaasha caafimaadka iskuuulada, iyo hoggaamiyaasha iskuulada sidii loo taageeri lahaa shaqaalaha iskuuladu inay karti u yeeshaan inay si wacan uga jawabaan dhacdooyinka la xiriira xanuunka COVID-19. Dukumentigani wuxuu sharaxayaa tallaabooyin lagama maarmaan ah iyada oo uu bixinayo guudmar guud oo ah qodobada go'aanada la qaadanayo, laakiin maaha kuwo meesha ka saaraya khabiirada caafimaadka, dadka aqoonta u leh cudurada faafa, ama xalalka dhabta ah ee iskuulada deegaanku. Hoggaamiye kasta oo iskuul wuxuu u baahan doonaa inuu sii wado qiimeynta jawaabta ay ka bixinayaan habraacyada markuu xanuun ka dilaaco, qorshayaasha wararka ugu dambeeyey, iyo isku dheelitirka caafimaadka iyo nabadgelyada ee baahiyaha salka u ah waxbarashada iskuulada.